Disability Rights OHIO

# XAASHIDA 2-AAD EE TALOOYINKA U-DOODISTA

## MAXAAN SAMEEYAA HADDII DUGSIGAYGU RAACI WAAYO QORSHAHA IEP/504 EE ILMAHAYGA?

### I. TALLAABADA KOOWAAD: FAHAM WAXA QORSHAHA KU JIRA

Hel nuqulka qorshaha oo si taxadar leh u akhri. Dugsiga wuxuu mas'uul ka yahay kaliya bixinta waxa qorshaha ku jira.

> **Talo:** Ka shaqee inaad xaqiijiso in qorshuhu u qoran yahay si **cad/waadax ah oo biyo kama dhibcaan ah.** Tusaale ahaan, daaweynta/dabiibinta jireed waxaa lagu bixin karaa siyaabo kala duwan, oo ay ku jiraan mid-mid, goobaha kooxaha yaryar, gudaha fasalka, ama qolka dabiibinta. Xaqiiji in qorshuhu uu si fahfaahsan u sheegayo waxa la rabo in la bixiyo.

### II. TALLAABADA LABAAD: LA HADAL QOFKA SAXDA AH

La xidhiidh macalinka/shaqaalaha masuulka ka ah qaybta qorshaha ee aan la raaci haynin oo kala hadal iyaga. Isku day inaad shaqaalaha ka mas'uulka ah kala shaqeyso xeelad lagu hirgelinayo qorshaha.

> **Talo:** Ku dar qaab lagu cabbirayo in qorshaha la raacayo iyo in kale. Tani waxa ka mid noqon kara warbixino joogto ah oo la siiyo waalidka oo ku saabsan horumarka ama bixinta adeega, ama nidaamyada xog ururinta ee beegsiga ah.

### III. TALLAABADA SADDEXAAD: CODSO KULAN

Marka arrimaha aan lagu xallin karin wadahadalo aan rasmi ahayn oo lala yeesho shaqaalaha dugsiga, **codso kulanka kooxda IEP ama 504.** Dhammaan shaqaalaha lagama maarmaanka u ah xallinta arrinta waa inay ka soo qaybgalaan kulanka.

> **Talo:** Waxaad codsan kartaa kulan xitaa haddii aad horey u yeelatay kulanka IEP intii lagu gudajiray sanadka. Inta kulankan lagu jira, waxaad adeegyo ku dari kartaa IEP ama waxaad bedeli kartaa luuqad aan caddayn.

Haddii dugsigaagu ka jawaabi waayo codsigaaga kulanka ama uu diido inuu ku siiyo kulan, waa inaad **codsiga qoraal ku qortaa.** Laba toddobaad ayaa guud ahaan ah wakhti macquul ah oo dugsigu kaga soo jawaabi karo warqadaada. Haddii kulan aan wali la bixin, waa inaad la xiriirtaa Waaxda Waxbarashada ee Ohio (Ohio Department of Education, ODE) oo aad codsataa in shaqaalaha ODE ay u soo wacaan dugsigaaga iyagoo ku matalayo si ay kaaga caawiyaan inaad kulan hesho.

**Talo:** La xidhiidh isku-duwaha waxbarashada qaaska ah ama agaasimaha degmadaada si aad u codsato kulan. Xafiiska guddiga dugsigaaga ayaa kuu sheegi kara cidda isku dubbarida waxbarashada qaaska ah ee degmada dugsigaaga.

Isbedelka lagu sameynayo qorshaha ee lagu heshiiyey waa in lagu qoraa qorshaha. Haddii dugsigu ku qanci waayo beddelka aad codsatay, waa inaad taageero u raadsataa taladaada/codsigaaga.